

U soo saarista si badbaado leh iyo qaadista Irbadaha iyo siriinjyada

September 2003



Khatarta qaadist HIVga (Fayrska keena AIDSka) ama Fayrasyada kale ee ka dhasha dhiiga marka uu dhaawac kaa soo gaaro Irbad ama siriinj aad bay u hoosaysaa.

Maxaad samaynaysaa haddii aad heshid Irbad ama siriinj la tuuray

Haddii aanad adigu rabin inaad qaado Irbadaha iyo siriinjyada, ama ay meel xun yaalaan, la xiriir laynka caawinta qaadista 24ka saacadood si aad macluumaad dheeraad ah u heshid ama aad u diyaarisid in meesha laga qaado.

Laynka ka caawinta qaadista (Disposal Help-line) 1800 552 355

Ama

Haddii aad adigu naf ahaantaadu meesh ka qaadaqysid:

- Gasho gacmaha rabadh ama gacmo gashi balaastik ah taxadir ahaan. Gacmo gashiyada qalifsani, sida kuwa beeraha loogu tala galay way adag tahay in siriinjyada iyo irbadaha lagu qaado.
- U qaado weelka loogu talagalay iyo daboolkiisa goobta. Weelkaas waxa laga helaa barnaamijyada siriinjyada iyo Irbadaha iyo dawladaha hoose badankaooda. Haddii aanad weelkaa haysanin, isticmaal weel caag adaga ah sida dhalada caagga ee ay ka dhamaatay walxaha wax lagu nadiifiyo. **Ha isticmaalin** dhalo quraarad ah waxa laga yaabaa inay jabto.

- Haddii ay dhib kugu noqoto inaad gaarto, si taxadir leh uga qaad qashinka iyo wixii kale ee ku hareeraysan si aad si fiican ugu dhawaatid.
- Haddii ay ka badantahay hal irbad iyo siriinj kala saar adiga oo isticmaalaya xaaqinka xaggiisa dambe. **Si taxdir u samee.** Markaas si sahalan baa loo kala saari karaa siriinjka iyo irbadaha mid midna loo soo qaadi karaa.
- Soo qabo siriinjka iyo irbadaha xagooda dambe (Xagga dambe ee balaastika ah). **Ha soo qabanin** caarada hore ee irbadda. Hubso in caarada irbadu kaa sii jeedo.
- **Waligaa ha is gelinin** daboolka irbadda iyo siriinjka, xitaa haddii daboolka isna la tuuray.
- Ku rid irbadda iyo siriinjka weelka iyadoo irbadu hoos u sii jeedo. Wiilku waa inuu meel isku siman yaalaa ee aan gacmaha lagu qabanin.
- Ku adkee furka weelka.
- Gacmagashiga iska saar kuna rid kiishka balaastiga ah. Gunud dacalka kiishka kuna rid qashin qubka.
- Ku dhaq gacmahaaga biyo iyo saabuun.
- Si loo qaado weelka u qaad barnaamijka siriinjyada iyo irbadaha ee degaankaaga, xafiiska dawllada hoose ama la

xiriir laynka caawinta qaadista wixii talo ee dheeraad ah. Ha ku ridin irbadaha iyo siriinjyada qashin qubka, bulaacadaha iyo musqulaha.

Maxaad samaynaysaa haddii ay irbadi ku muddo

Haddii ay irbad iyo siriinj la tuuray ku muddo (Badiyaa ugu gudbi si deg deg ah 'meesh loogu tala galay dadka irbadaha ku dhaawacmay'), Talaabooyinka soo socda waa in la qaadaa:

- Meesha biyo ku shub.
- Nabarka biyo iyo saabuun ku dhaq.
- Ku shub jeermi dile (antiseptic) nabarka kuna xir balastar aan biyaha soo daynin.
- Raadso kaalmo caafimaad si loo qiyaaso khatarta caabuqa loona helo daaweyn ku haboon.
- Haddii irbadda iyo siriinjka la soo saari kari waayo, calaamadi meesha si aanay dadka kale khatari u soo gaarin lana xiriir laynka caawinta.